



Qofka macaamiilka ah ayaa horay u sii buuxinaaya foomka cadaynta talaalka, dabadeenka foomka oo la soo buuxiyey u keenaya kalkaalisada/kalkaaliha caafimadda ee qaabilaysa. Waxaan rajeyneynaa in dadka safarada fog fog aadaya ay kalkaalisada/kalkaaliyaha caafimaadka ugu yimaadaa qorshaynta talaalka laba bilood kahor inta uusan safarku bilaaban.

MACLUUMAAD KA QOFKA	Magaca	Lambarada dhalashada
	Cinwaanka	
MEESHA SAFARKA LOO AADAYO IYO WAQTIGA LA SAFRAYO	Meesha safarka loo tegayo iyo wax ka sheegida meesha	
	Maalinta la baxayo	Inta uu le'egyahay waqtiga safarka lagu maqnaanayo
XANUUNADA HADA JIRA IYO DAAWOYINK HADA LOO ISTICMAALO		
DAAWOYIN- KA AAD XASAASIYADA KU QABTID	<input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Haa, midee/kuwee?	
TALAALADII HORE Halkaan ku cadee dhamaan talaaladii aad horay u soo qaadatay. Hadii loo baahdo waxaad horay u soo qaadan kartaa shahaadada talaalka koobigeeda ama asalkeeda.	Magaca talaalka	Sannadkee lagu talaalay (qiyaasta sanadka oo sugan)



Sida aad qiyaaseysid adigu maxay yihiin khataraha caafimaad ee safarkaagan ugu waaweyn, sideese ayaad ugu diyaar garowday/ aad dooneysaa inaad ugu diyaar garowdo?

Maxaa kale oo aad dooneysaa inaad ka sheegto xaalada caafimaadkaaga ama safarkaaga?

Taariikhda	Sixiixa qofka la talaalay	Magaca talaalaha, magaca darajadiisa shqo iyo telefoonka
------------	---------------------------	--

HAGITAANO/TILMAAMO

Dadka u safraya meelaha ka baxsan Yurub ama Waqooyiga Amerika dukumintiyada talaalka safarka ee ay u baahanyihiin waxba laga qabanmaayo hadii aysan horay u sii buuxin una soo gudbin foomka cadaynta talaalka ee safarada fog fog.

Talaal dhawraha (rokotesuoja) dadka u safraya meelaha ka baxsan Yurub ama Waqooyiga Amerika waxaa lagu hubinayaa qaabilaada kalkaalisada/kalkaaliyaha rugtaada caafimaadka. Waxaa si gaar ah muhiim u ah in la cadeeyo talaaladii horay loo soo qaatay, xitaa talaalada aan lagu qaadan xarunta caafimaadka ee Helsinki. Sidoo kale marka loo safrayo wadama Midowga Yurub (EU) ama wadamada Aagga dhaqaalaha reer Yurub (ETA) dhexdooda waxaa haboon oo lagama maarmaan ah in la qaato **caymiska safarka**, sababtoo ah qofka qaata camiskan wuxuu si ka waafisan heshiisyada guud ee badbaadada bulshada ee ka dhexeeya wadamadaas uu caymisku uga daboolayaa kharashaadka jirookinka iyo shilalka.

Xaruntaada caafimaadka waa in lagu sameeyo qiimeynta baahida talaalka- iyo daweynta ka hortaga ah iyo talaalkaba.

- 1) Qofka macaamiilka ah ayaa horay u sii buuxinaya foomaka-cadaynta talaalka ee qofka meelaha fog fog u safraya.
- 2) Qofka macaamiilka ah ayaa waqti ka qabsanaya kalkaalisada/kalkaaliyaha [xaruntiisa caafimaadka](#).
- 3) Qaabilaada kalkaalisada/kalkaaliyaha caafimaadka waxaa lagu falanqaynayaa foomkii **horay loo sii buuxiyey** waxaana la samaynayaa qorshe talaal oo bilow ah. Isla goobta ayaa lagu siinayaa qofka qaar kamida talaalada ka dhimman, sidaas hadii aysan suurtoagal ahayn, waxaa qofka macaamiilka ah lagala heshiinayaa dawooyinka talaalka ee ay tahay inuu warqada dhakhtarka ku doonto iyo dawooyinka ay tahay inuu kahortag ahaanta u qaato. Helitaanka waraaqaha dawooyinka talaalka waa in lagu talogalo in lasugo mudo usbuuc ah.
- 4) Qofka macaamiilka ah markii uu helo warqada daawada wuxuu daawada talaalka/talaalada ka doonayanaa farmashiga.
- 5) si waafaqsan qorshaha waqti ka qabso [xarunta caafimaadka](#).